

# FIDINTA MARINTAANKA (BUUNDADA HOOSE) EE SPOKANE ST SWING BRIDGE

## Su'aalaha badanaa la is weydiyo

### **Sidee SDOT u bilawday curinta nidaamka cusub lagu maro buundada hoose?**

Waan la soconnaa in dadka ku nool kana shaqeeya Galbeedka Seattle ku sugan yihiin xaalad gooni ah oo nagu cusub, ka wada xaajoodka xiritaanka buundada sare oo sidoo kale la halgamaya maalin kasta cudurka baahsan ee caalamka ka jira.

Waxan sii wadnay ururinta macluumaadka mugga baabuurta ku saabsan buundada hoose ilaa intii aynu bilownay xoojinta sawir ka qaadista Janaayo 2021. Dadaalladaasi lagu ilaalinayo waxey muujiyeen iney ka jirto mug xaddidan oo dheeraad ah buundada hoose.

Waxan kaga maqalnay xubno badan oo bulshada ah cinwaanka iimeelka iyo wicitaannada telefoonnada mashruuca oo ay la socdaan sababaha maritaanka buundada hoose u tahay caawimaad. Waxan sidoo kale la xiriirnay ganacsiyada iyo hey'adaha ka jira Galbeedka Seattle, iyadoo diiradda la saarayo bulshada midabka ah, si si fiican loogu fahmo caqabadaha heysta.

Iyadoo qeyb ka ah siyaasadda la cusbooneysiyyey, waxan u fidineynaa in buundada hoose marin u helaan dadka raadsanaya daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo, shaqaalaha caafimaad ee wicitaanka ku shaqeeya, maqaayadaha iyo ganacsiyadaa tafaariiqda Galbeedka Seattle, iyo kuwaa isticmaala faananka, basaska ama gawaarida rasmiga ah ee raacidda la wadaago ee leysinnada taargo ee baabuurta la wadaago ee gobolku soo saaro.

<https://www.dol.wa.gov/vehicleresistration/sprideshare.html>



Uma fidin karno maritaan qof kasta, haddaba waxanu sameynay kala doorasho siyaasadeed oo adag. Waxanu sii wadi doonaa inaan dad la xiriirka la sii wadno bulshada Galbeedka Seattle, iyo waxanuna sii wadi doonaa indho ku heynta socodka baabuurta iyo oddoroska si loo fahmo sida isbeddelladaasi siyaasadeed u saameynayaan mugga buundada hoose.



### **Project Information and Contact**

Website: [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge)

Email: [westseattlebridge@seattle.gov](mailto:westseattlebridge@seattle.gov) | Phone: (206) 400-7511

**Sideen ku codsan karaa  
maridda buundada hoose?  
Gacan ma la iga siin karaa  
buuxinta foomka?**

Ka dalbo onleen Codsigu wuxuu ku diyaar yahay [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge) Codsiyadu waxey diyaar ku yihiin luqadahan soo socda: Ingiriis, Isbaanish, Kuuriyaan, Soomaali, Shiinees, (soo jireenka ah), Fitnaamiis, Oromo, iyo Khamer. Si aad u weydiisato codsiyada luqadaha kale ama iyagoo hab warqad ah, fadlan nagala soo xiriir [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) or 206-400-7511.

Waxan ku faraxsanahay inaan kaa gacan siinno buuxinta foomka codsiga maritaanka. Noo soo iimeel garee [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) ama naga soo wac (206) 400-7511, waxana kula soo xiriiri doona qof ku caawiya.



Haddii adiga ama qof aad taqaano ku hadlin luqadda Ingiriiska ugana baahan yahay gacan buuxinta foomka codsiga ama qabo su'aalo, waxad wici kartaa (206) 400-7511 noo dhaafi kartaa farriin cod ah ama iimeel [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov). Keen magacaaga, warbixinta lagaala soo xiriirayo iyo luqadda loo baahan yahay ka dibna qof ayaa ka soo jawaabi doonaa wicitaankaadii.



**Seattle**  
Department of  
Transportation

## Maxaad baabuurta ugu adkeyneysaan (buundada hoose) ee Spokane St Swing Bridge?

Markii Buundada Sare Kacsan (buundada sare) ee Galbeedka Seattle la xiray bishii Maars 23, 2020 sabab la xiriirta dilaacyo, waxanu adkeynay maridda (buundada hoose) ee Spokane St Swing Bridge. Buundada sare waxey ku xambaari jirtay tiro aad u badan oo gawaari ah toddobada leen marka la bardhigo buundada hoose. Isku dayga in dhamaan socodkii buundada sare loo wareejyo buundada hoose waxey dhalin kartaa ciriiri iyo dib u dhac hor istaagi kara tayada socodka baabuurta emerjensiga, basaska, iyo xamuulka.



## Sidee bay sawir-qaadista ootomaatigga ah uga shaqeysaa buundada hoose? Ma waxan heli doonaa tikidh 75 doolar?

Haddii aan laguu oggolaan inaad ku waddo buundada hoose, waxad heli doontaa 75 doolar tikidh mar kasta ood ku waddo buundada hoose. Nidaamka masawiridda ootamaatigga ah ee lagu xoojiyey wuxuu sawirro ka qaadayaa qaadayaa taargada leysinnada marka buundada hoose xadidan tahay maalmaha toddobaadka ka bilaabata 5-subax ilaa 9-ka fiidkii iyo maalmaha dhamaadka toddobaadka 8-da subax ilaa 9-ka fiidkii. Nidaamka sawir-qaadista ootomaatigga ah ee la xoojiyey wuxuu sawirro ka qaadayaa baabuurta si uu u xafido taargada leysinka gaariga. Sawirrada waxa kaliya loola jeedaa in loo isticmaalo xoojinta xadidaadda lagu soo rogay buundada hoose mana loogu talo gelin tallaabo sharci xoojin kale. Nidaamka xoojinta sawir ka qaadista otomatigga ah wuxuu isku eegayaan lambarrada leysinnada taargooyinka oo leh saldhig maclumaad qeexaya isticmaalayaasha loo oggolaaday in la ogaado in gaariga loo oggolaaday inuu isticmaalo buundada hoose waqtigaasi. Saraakiisha Waaxda Booliska Seattle waxey eegi doonaan muuqaal xad-gudub kasta oo suurto gal ah ka hor inta aan la dirin tikid 75 doolar ah. Baabuurta imerjensiga, basaska, iyo gaadiidka xamuulka uma baahna iney u keenaan SDOT leysinnada taargooyinka.



## Haddii aanan ku wadi Karin buundada hoose, sidee kale oon ku tagi karaa ama kaga soo nqon karaa Galbeedka Seattle?

Waddooyin kale oo dadka socdaalaya gaari ku tagi karaan ama kaga imanayaan Galbeedka Seattle waxa ka mida Buundada 1st Ave S Bridge ama Buundada South Park. Buundada hoose sidoo kale way kuu furan tahay haddii aad ku socoto bas, faan la isla raaco, socod, rucleyn, raacis mootada cagta korontada, ama baaskiil. Dadka wada emerjensiga, basaska dadweynaha, iyo gaadiidka xamuulka waxey isticmaali karaan buundada saacad kasta maalintii.



Waxanu ka shaqeynoynaa inaan gacan ka geysanno in la sahlo leexadyada iyadoo la casiriyeynayo calaamooyinka waddooyinka. Waxan kaloon la shaqeyneynta bulshooyinka ku dhow si mudnaanta loo siiyo mashaariicda yareyn doonta saameynta baabuurta badan ee leexata; mudnaanta la siinayo basaska tagaya ama ka soo noqonaya Galbeedka Seattle; dhisidda mashaariic baaskiillo cusub; iyo abuuris iyo horumarin waddooyinka leexadka.

Caawimaad haddaad uga baahan tahay socodkaaga, ka booqo webseydka cusub ee West Seattle and Duwamish Valley Travel Options halkan

<https://www.seattle.gov/transportation/west-seattle-travel-options/>

Ka warran haddii ay jirto deg-deg una baahanahay inaan ku wado buundada hoose?

Waan la soconnaa in emerjensiyada dhacaan, waxadna u baahan kartaa inaad u wadato cisbitaalka halkii aad ka wacan laheyd ambalaas.

Imika iyadoo xoojinta otomaatigga ah ay shaqeneyso, tikidh 75 doolar ayaa loo diri doonaa dhammaan dadka ku wada baabuur aan loo oggoleyn buundada hoose maalmaha toddobaadka 8-da subax ilaa 9-ka fiidkii iyo dhamaadka toddobaadka 8-da subax ilaa 9-ka fiidkii.

Tikidhka 75-ka doolar waxa ku jiri doona tusaaleyn sida aad uga dooddi karto. Kuuma xaqiijin karno inaadan masuul ka noqon doonin bixinta lacagta, iyadoo tani tahay mid marka ugu dambeysa ay go'aan ka gaari doonto Maxkamadda Munishiibiyada Seattle.